

Xagaaga P-EBT waa diyaar!



Waa Maxay Xagaaga P-EBT?

Barnaamijka EBT Xanuunka, ama P-EBT, wuxuu siinayaa kabka cuntada caruurta si uu ubadelo kharashaadka cuntooyinka iyadooy ugu wacan tahay adeega cuntada hal meel ee dugsiyada iyo xarumaha daryeelka caruurta iyadooy ugu wacan tahay COVID-19. Waxaanu helnay ansixinta fadaraalka si aan u kordhino P-EBT bilaha xagaaga.

Yaaa ku haboon?

Caruurta waxay si toosa ugu haboonaan karaan Xagaaga P-EBT haddii ay buuxiyaan mid ka mida kuwan soo socda:

- Waxay ku haboon yihiin cuntooyin bilaasha ama qiimo jaban dugsiga sanad dugsiyeedka 2020-21 waxaana lagu diwaangaliyey oo lagu qoray dhamaadk sanad dugsiyeedka Washington dugsiyada caadiyan ka qeybqaata National School Lunch Program (Barnaamijka Qadada Qaranka ee Dugsiga) ama School Lunch Program (Barnaamijka Quraacda Dugsiga).
- Caruurta ka yar 6 ee ka tirsan qoyska ku jira barnaamijka Washington ee caawimada Basic Food (Cuntada Asaasiga) ah inta u dhaxaysa Juun, Julaay, ama Ogos 2021.

Siday qoysasku ku heli karaan Xagaaga P-EBT?

- Qoysaska leh caruurta buuxisay shuruuda la xusay uma baahna inay shayna sameeyaan! Kabka Xagaaga P-EBT ayaa si toosa loogu soo saari doonaa.
- Qoysaska aan marka horeba buuxin shuruuda ku haboonaanshuhu waxay wali u gudbi karaan Xagaaga P-EBT haddii ay sameeyaan kuwan soo socda ka hor Ogos, 31, 2021:
 - **Caruurta Dugsiga ku Jirta -**
Haddii cunugaaga laga diwaangaliyey dugsi bixinaya NSLP mudada Juun 2021, gudbi codsi cunto bilaasha ama qiimo jaban si dugsigu kuugu ansixiyo. Haddii cunugaaga loo ansixiyo cuntooyinka bilaashka ama qiimaha jaban, waxaad heli doontaa kabka Xagaaga P-EBT.
 - **Caruurta dadoodu ka yar tahay 6 -**
U gudbi codsi Basic Food (Cuntada Asaasiga) ah: www.WashingtonConnection.org ama ka wac DSHS Xarunta Adeega Daryeelka Macmiilka 877-501-2233 wixii wareysi ah.

Intee inleeg ayey qoysasku heli doonaan?

Caruurta ku haboon Xagaaga P-EBT waxay heli doonaan lacag dhan \$375 halmar si ay u daboolaan bilaha xagaaga ee Julaay iyo Ogos 2021.

Miyey qoysasku heli doonaan kaadh P-EBT oo cusub bilkasta?

Maya, qoysasku waa inay u hayaan cunug kasta kaadh P-EBT. Ansixinta fadaraalka ka dib, waxaan dib ugu buuxin doonaa kaadhka haddii COVID-19 xaalada caafimaad ee dadweynuhu sii socoto.

Booqo dshs.wa.gov/PEBT si aad waxbadan u ogaatid!

Haddii aad u baahan tahay macluumaadkan oo luuqad kale ku qoran, booqo wabsaaydka ama ka wac P-EBT Xarunta Xiriirka **833-518-0282**.

Qoysaska waxa lagu dhiirgalinayaa inay ka qeybqaataan cuntooyinka diyaarka ah ee dugsiyada xataa haddii ay haystaan kabka P-EBT.

Haayadani waa adeeg-bixiye loo siman yahay.



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives